

— 831 —

Qodobka 220aad

Waxyaalaha ka dhalanaya dhicidda dacwadda

Dhicidda Dacwadda ma riddo xaqa, laakiin la tixgelinmaayo til-laabooyinkii la qaaday, waa u bannaan tahay Garsooraha Dacwadda mar labaad la hor keenayo in uu miisaamo qiimaha qalabka sugidda loo keenay isagoo cuskanaaya dadaalkiisa Foojigan.

Kharajka Dacwadda dhacday waxaa xambaaraya dhinacyada horey u keenay.

BAABKA LABAAD

DURIDDA

MADAXA KOOWAAD

JIDADKA DURIDDA

Qodobka 221aad

Jidadka Duridda

Jidadka xukumada la duro waxay yihiin:

Rafcaan, u cabashada Maxkamadda Sare, weydiisashada ka noqoshada iyo ka hortagga fulinta.

Qodobka 222aad

Xukunka dhammaystay Jidadka duridda

Xukunka dhammaystay jidadka duridda waa kan aynan bannaanayn in lagu duro jid ka duwan kan weydiisashada ka noqoshada.

Qodobka 223aad

Muddada Duridda

Muddada duridda waa 30 beri oo go'an, kana billaabaneysa taariikhda gaarsiiyey Xukunka. Ayadoo aan la tixgelinaynin gaarsiinta, ma bannaana in lagu duro jidadka duridda xukunka ay ka soo wareegto faafintiisa hal Sano sida waafaqsan Qodobka 93.

Qodobka 224aad

Meesha gaarsiinta duridda

Waxaa waajib ah in dhinaca kale lagu gaarsiiyo duridda meesha degganaanshihiisa uu ku tilmaamay warqadda dacwadda ama tan ja-waab celinta ee Maxkamadda hoose, marka laga reebo inta lagu cad-deeyey Qodobka 200.

Qodobka 225aad

U wicidda iska hor keenidca

Haddii xukunka lagu dhawaaqay oo ka dhexeeyo dhinacyo badan, laga duro dhinacyada qaarkood, Garsooraha haddii loo baahdo, wuxuu amri karayaa inuu u waco iska hor keenid, muddana u qabto si loo gaarsiiyo duridda dhinacyada kale.

Qodobka 226aad

Duridda Ka hortagga ah

Waa u bannaan tahay qofka racfaanka laga qaatay iyo kuwa lagu soo sheegay qodobka hore in ay soo hor dhigaan isla dacwadda dhex-deeda duritaan ka hortag ah oo lid ku ah xukunka.

Waxay ka bilaabanaysaa muddada duridda ka hortagga ah, oo ah soddon beri taariikhda gaarsiinta duridda asliga ah.

Qodobka 227aad

Midaynta duridyaalka kala duwan

Waxaa waajib ah in dacwad keliya la isugu keeno duridyaalka ka-la-geddisan oo lid ku ah xukun keliya.

Qodobka 228aad

Joojinta fulinta

Racfaanku wuxuu joojinayaa fulinta xukumada haddii aan la am-rin fulintooda ku meel gaarka ah, jidadka kale ee duridda ma joojina-yaan fulinta haddii laga reebo gooraha xeerku si cad u sheegayo.

Qodobka 229aad

Waxyaalaha ka dhasha dhicidda duridda

Haddii dacwadda duriddu dhacdo, xukunka la duray wuxuu noqo-nayaa dhammaad.

MADAXA LABAAD

RACFAANKA

Qodobka 230aad

Racfaan qaadashada

Waxaa bannaan in laga qaato racfaan xukunnada darajada koo-waad ee kasoo baxa Maxkamadaha Degmooyinka iyo Gobollada haddii qaynuunka uusan reebin ama dhinacyadu ku heshiin.

Qodobka 231aad

Maxkamadda Rafcaanka

Waxaa racfaan looga qaadan karaa xukunnada Maxkamadaha Degmooyinka iyo Gobollada Maxkamadda Rafcaanka ee ku taal meesha ay ku taal Maxkamadda xukunka soo saartay.

Qodobka 232aad

Qaabka Racfaanka

Racfaanka waxaa lagu soo qaadanayaa warqadda u yeeridda ah ee koobaysa waxyaabaha dhacay iyo asbaabta duridda, waxaana loo geynayaa Maxkamadda soo saartay go'aanka la duray, taasoo u gudbi-neysa daah la'aan galka oo uu la soodo xukunka la duray Maxkamadda Rafcaanka.

Qodobka 233aad

~~Qaabka keenista racfaanka ka hortagga ah~~

Racfaanka ka hor tagga ah waxaa lagu keenayaa warqad jawaab celin ah ee lagaga hortagaayo duridda asalka ah.

Qodobka 234aad

Soo dhex galka racfaanka

Waxaa loo oggol yahay dhinaca saddexaad oo ay u bannaan tahay inuu ka hortago fulinta xukunka, asagoo ilaalinaayo xaqiisa inuu soo dhex galo racfaanka.

Qodobka 235aad

Weydiisyaha iyo wax ka qabidda cusub

Ma bannaana in la keeno Maxkamadda Rafcaanka weydiisyo cusub, haddii la keenana waa in ay iyadu diidaa; waxaase bannaan in la keeno wax qabid iyo Dokumentoooyin cusub, iyo t.lmaamid jidad Sugid ee aan la keenin darajada koowaad.